**Shuruudaha Baadi Goobka Shaqada:**

Shaqo raadin markasta oo usbuuc kasta ah iyo iska diiwaangelinta wakaalada xoogga shaqaaalaha ee gobolkaaga ayaa loo baahan yahay. Dacwoodayaasha gobolka ayaa si otomaatig ah looga diiwaan geliyaa SDWORKS ee goobta xogta shaqooyinka marka dacwad la xareeyo.

Caawimada shaqo raadinta waxaa laga heli karaa xafiiska shaqada ee DLR ee deegaankaaga. Waxaa laga yaabaa in lagaaga baahdo inaad ka qaybgasho barnaamijyada qaarkood si aad manfacaad u hesho. Si aad u hesho xafiiska shaqada ee kuugu dhow, booqo **dlr.sd.gov** oo guji “Job Service Offices.”

Raadinta firfircoon/markasta ah ee shaqada ee toddobaad kasta waxaa ka mid ah:

- Laba xiriir shaqo oo la aqbali karo
- Habab raadineed oo la aqbali karo oo ayna daacad ku dheehan tahay
- Diiwaanada faahfaahsan ee xiriirkaaga si loo xaqiijiyo. Waxaad u baahan doontaa inaad ka warbixiso:
  - Magaca buuxa ee ganacsiga
  - Cinwaanka ganacsiga (iimaylka ama websaydka haddii ay ku khusayso)
  - Lambarka taleefanka - oo ku jiro koodhka goobta
  - Taariikhda iyo habka xiriirka
  - Magaca qofka lala xiriirayo (haddii ay khuseyso)
  - Booska la codsaday

Tusaalooyinka hababka raadinta ee aan la aqbali karin waxaa ka mid ah la xiriirida iyadoo la isticmaalayo telefoon, xayaysiisyada wargeysyada iyadoo aan la aqoonsan loo-shaqeeye, la xiriiritaanada interneetka ee lagu sameeyo mashiinaha raadinta (haddii aysan ahayn aan in loo-shaqeeye iyo jeego/boos gaar ah la aqoonsaday), ama la xiriiritaanada lala sameeyay qaraabada ama lammaanaha dhow.

**Waa mas'uuliyaddaada inaad ogaato oo aad fahanto sharciyada iyo xeerarka iyo inaad bixiso macluumaad sax ah. Bixinta qoraalo iyo macluumaad been ah, ama dib u haysashada macluumaadka, si aad u hesho manfacaadka aanad xaq u lahayn waa khiyaamo. Haddii aad sameyso wax isdaba marin ama khiyaano waxaa lagaa rabaa inaad dib u soo bixisid manfacaadka caawimada ku aadaneed dib u shaqaysiinta.**

**Liiska ay tahay inaad eegto si aad u Hesho Manfacaadka oo aadna Iskaga Ilaaliso Khiyaanada:**

- ☐ Codso isla marka aad shaqo la'aan noqoto.
- ☐ Si firfircoon u raadi shaqo oo diyaar u noqo inaad aqbasho dalabyada shaqada.
- ☐ Xaree codsi toddobaadle ah oo lacag-bixineed toddobaad kasta oo aad manfacaadka codsanayso.
- ☐ Ka warbixi saacadahaaga iyo dakhligaaga, oo ay ku jiraan shaqo xilli dhiman/gelin ama ku meel gaar ah haddii aad shaqaynayso adigoo markaa buuxsanayso manfacaad.
- ☐ Ka warbixi dhammaan kala bixitaanada shaqooyinka.
- ☐ Ka jawaab dhammaan codsiyada lagaaga rabo macluumaad.
- ☐ Jooji xareynta codsiyada lacag-bixineed ee toddobaadlaha ah isla marka aad bilowdo shaqo waqti-buuxda ah.

## Su'aalo?

**Ka Wac Adeegga Macmiilka 605.626.2452 Isniinta illaa Jimcaha, 8-da subaxnimo illaa 5-ta galabnimo.**

*Tusaalooyinka khiyaanada waxaa ka mid ah:*

- *Ku guuldareysiga ina la soo sheego dakhliga iyo/ama talooyinka*
- *Ku guuldareysiga in aad sheegto iskaa u shaqeysiga*
- *Ku guuldareysiga in la soo sheego diidmo shaqo*
- *Ku guuldareysiga ina la soo sheego ku laabashadaada shaqada*
- *Soo sheegida beenta ah ee ku saabsan inaad awooday inaad shaqeyso*
- *Soo sheegida shaqo ka fariisin been ah*
- *Soo sheegida shaqo raadin been ah*
- *Qaadashada manfacaadka aigoo markaa sugaya jeeggaaga lacag bixinta ee ugu horreeya*

## Nagu soo Xiro

**South Dakota Department of Labor and Regulation**
Reemployment Assistance Division
P.O. Box 4730, Aberdeen, SD 57402-4730
**Taleefonka:** 605.626.2452 | **Fakiska:** 605.626.3172

Printed on Recycled Paper

SOUTH DAKOTA DEPT. OF **LABOR** & **REGULATION**

# Caawimaada Dib-u-shaqaaleynta

Sida loo xareeyo Dacwada Caawimada ku aadan Dib-u-shaqaaleynta

*Hadafka ku aadan caawimada dib-u-shaqaaleynta waa in lagugu caawiyo sidii aad dib ugu shaqayn lahayd sida ugu dhakhsaha badan. Sharci ahaan adigaa mas'uul ka ah inaad raacdo xeerarka sida uu qabo sharciga gobolka South Dakota adigoo markaa uruursanyo/helayo manfacaadka.*

*Waa inaad codsatid manfacaadka isla markaad aad noqoto shaqo la'aan ama haddii saacadahaaga la dhimay. Waxaa laga yaabaa inaad lumiso xoogaa manfacaad ah haddii aad cabaar sugto inaad xareyso. Dacwadaadu/Cabashadaadu waxay dhaqan gali doontaa Axadda toddobaadka aad xaraysay.*

**dlr.sd.gov**

Loo-shaqeeyaha Leh Fursad/Barnaamij Loo Siman Yahay
Ay Maalgelisay USDOL
Rev. 08/22

## WAXAAD U BAAHAN DOONTO SI AAD U XAREYSO

Waaxda Shaqada iyo Sharciga ee South Dakota (Department of Labor and Regulation, DLR) Qaybta Caawimada Dib-u-shaqaaleynta ayaa go'aamisa u-qalmitaankaaga manfacaadka.

Markaad xareyso cabasho, DLR waxay ku weydiin doontaa macluumaadka loo baahan yahay si loo go'aamiyo u-qalmitaankaaga. Loo-shaqeeyayaashaadii ugu dambeeyay ayaa sidoo kale lagala xiriiri doonaa in laga helo macluumaad.

Si loo xaqiijiyo in dacwadaada loo xareeyay sida ugu dhakhsaha badan, waa inaad diyaar ka sii digtaa macluumaadka soo socda:

- Lambarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga
- Lambarka laysanka darawalnimada ama aqoonsiga gobolka kale
- Taariikhda kusaabsan shaqaaleynta ee 18-kii bilood ee la soo dhaafay:
  - Magaca shaqo-bixiyaha kasta, cinwaanka iyo lambarka taleefanka
  - Taariikhaha shaqaaleynta (bisha iyo sanadka)
  - Qiimaha mushaharka
  - Sababta aadan wali usii ahayn mid halkaas ka sii shaqeenaya

Shey-yaasha kale ee ay tahay inaad diyaariso:

- Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah, lambarkaaga Diiwaangelinta Shisheeyaha
- Haddii aad tahay shaqaale federaal ah, foomamkaaga SF-8 iyo SF-50
- Haddii aad ka shaqeysay ciidanka, DD214-kaaga
- Haddii aad shaqeysay usbuuca aad xereyneyso, ogow tirada guud (wadarta doolarada iyo sentiyada ka hor wax ka jaris kasta) ee mushaarkaaga iyo wadarta saacadaha aad shaqeeysay ka hor intaanad xareyn

# RACLAIMS.SD.GOV

### SIDA LOOGA **XAREEYO DACWAD HORE ONLAYNKA**

Waxaad xereyn kartaa cabasho cusub oo ku aadan caawimada dib-u-shaqaalaynta ama waxaad dib uga furi kartaa dacwad horay usii jirtay wakhti kasta **RAclaims.sd.gov**.

1. Dooro Caawimada Dib-u- Shaqaalaynta ee Shakhsiyaadka(Reemployment Assistance for Individuals).
2. Guji Nidaamka Onlaynka ee Dacwada RA(RA Claims Online System)
3. Soo gal adiga oo isticmaalaya xogta isticmaalaha cinwaanka ee mySD. Isticmaalayaasha cusub ayaa looga baahan doonaa inay isdiiwaangeliyaan.
4. Kadib markaad soo gasho, buuxi Cinwaankaaga Diiwaangelinta RA ee Sheegashada/Dacwada (haddii aadan horay u dhamaystirin).
5. Dooro “File Your Claim.”
6. Geli macluumaadka la codsaday. Dhammaadka codsiga, waxaad awoodi doontaa inaad dib u eegto macluumaadka aad galisay oo aad isbedel ku sameyso.
7. Gudbinta ka dib, waxaad arki doontaa shaashadda "Request Confirmation", taasoo xaqiijinaysa in codsigaaga la gudbiyay.

**Haddii aad wax su'aalo ah qabto, kala xiriir Adeegga Macmiilka 605.626.2452.**

## GUJI AMA WAC SI AAD U XAREYSO

### SIDEE LOOGU **XAREEYAA IYADOO LA ISTICMAALAYO TALEEFON**

Waxaad fayl gareyn kartaa adiga oo ka wacaya **Xarunta Wicitaanka ee Sheegashada/Dacwada 605.626.3179**, Isniin ilaa Jimce, 8 subaxnimo ilaa 4:20 galabnimo (CT) marka laga reebo fasaxyada gobolka. Codsadayaasha hadalka iyo maqalka naafada ah waxay ka wici karaan Adeegga Gudbinta ee South Dakota 800.877.1113.

Haddii luuqad kale loo baahdo, ka wac **Xarunteena Adeega 605.626.2452** oo ka codso turjumaan si uu kuu caawiyo.

### MAXAA DHACAYA **KADIB MARKAAD XAREYSO SHEEGASHO/DACWO**

Macluumaad kasta oo aad ka hesho DLR waxay noqon kartaa mid waqti ahaan xasaasi ah oo saamaynaysa u-qalmitaankaaga manfacaadka. ***Dib u eeg si taxadar leh.*** Ka dib marka aad xareysato helida manfacaadka waxaad heli doontaa:

- Go'aaminta Lacageed ee Manfacaadka-qaddarka manfacaadka ee toddobaadlaha ah iyo wadarta guud ee cadadka manfacaadka haddii aad lacag ahaan xaq u leedahay.
- Liiska ay tahay inuu iska eego Dacwoodaha
- Buug-gacmeedka ***Xaqiiqooyinka Ku Saabsan Manfacaadka Caawimada*** Dib-u-Shaqaalaysiinta

Haddii dacwadaadu u baahan tahay xukun, DLR waxay soo ururin doontaa dhammaan macluumaadka lagama maarmaanka ah ee ku saabsan sheegashadaada, oo ay ku jiraan bayaanadaada iyo kuwa loo-shaqeeyahaagii hore. Go'aanka ugu dambeeya ee u-qalmitaanka waxaa lagu soo diri doonaa 21 maalmood gudahooda markaad hesho Go'aanka Lacageedka.

### XAREYNTA **TODDOBAADLAHA AH EE CODSASHADA LACAG BIXINTA**

Toddobaadka dacwada Caawimada Dib-u-Shaqaalaysiinta waxa uu bilaabmaa Axadda waxa uuna dhammaadaa Sabtida 11:59 habeenimo (CT). Codsigaaga toddobaadlaha ah ee lacag-bixinta ayaa loo xerayn doonaa usbuucii hore. Ma xerayn kartid toddobaadka ilaa uu ka dhammaanayo. Ka xaree onlaynka **RAclaims.sd.gov** ama adigoo wacaaya **605.626.3212**.

Haddii aad buuxiso dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka oo aad gudbiso codsigaaga lacag-bixinta toddobaad kasta, waa inaad ku heshaa lacag-bixintaada ugu horreysa saddex toddobaad gudahood ka dib markaad codsato manfacaadka.

Markaad xeraynayso codsigaaga toddobaadlaha ah ee lacag-bixinta, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad ka warbixiso xiriiradaada shaqo raadinta ee aad sameysay, haddii aysan ahayn in si kale laguugu faray.